



## **Cinwaanka: Kaalmada Dhaqaale – Adeegyada Cusbitalaalka 1.BR.34**

Taariikhda Dhaqangalka: 09/09/05; Dib loo eegay: 04/07, 12/07, 10/10, 08/11, 02/12, 01/16

**SIYAASADDA:** Nidaamka Caafimaadka Iowa, d/b/a Cusbitalalada UnityPoint Health (UPH) iyo Ururrada Cusbitalaladu waxay oofinayaan himilooyinkooda khayriga ah iyaga siinaya gurmud iyo daryeelka caafimaad ee daruuriga ah dadka oo dhan iyaga oon eegayn awooddooda iska bixinta lacagta. Cusbitalalada UPH iyo Ururrada Cusbitalaladu waxay siiyaan kaalmo dhaqaale bukaanada mutaystay.

**BAAXADDA:** Dhammaan Cusbitalalada UPH iyo Ururrada Cusbitalaladu (oo la isku yidhaadho “Cusbitalalada UPH”) kuwaasi oo ah cashuur ka dhaafista 501(c)(3). Jadwalka C, lifaaqu, wuxuu sharxayaa adeegyada iyo meheradahadaha bixiyaha lagu daboolo Cusbitalalada UPH.

**MABAADIIDDA:** Maadaama ay yihiin ururro khayri ah oo cashuurta laga dhaafay marka la eego Xeerka Dakhliga Gudaha (IRC) Qaybta 501(c)(3), Cusbitalalada UPH waxay buuxiyaan baahiyaha daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah ee dhammaan bukaanada raadinaya daryeel, iyada oon la eegin awooddooda iska bixinta lacagta adeegyada la siiyo. Sidoo kale, bukaanada waxa saaran inay helaan caymis oo ay iska bixiyaan qayb kamid ah adeegyada daryeelka caafimaad, Cusbitalalada UPH-na waxa saaran inay ka raadiyaan lacag bukaanada.

Marka la eego Qaybta 501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha, si uu ugu sii jiro cashuur dhaafista, mid kasta Cusbitalalada UPH waxa laga rabaa inuu hirgaliyo oo uu si wayn u shaaciyo siyaasaddiisa kaalmada dhaqaale.

Ujeedada siyaasaddan waa in la iftiimiyo duruufaha ay Cusbitalalada UPH ku siin doonaan daryeel qiime-dhimis leh bukaanada dhaqaale ahaan baahan.

### 1. Qeexdimaha.

- 1.1 Cusbitalaal. Waa xarun gobolku ka rabo in liisan la siiyey, la diiwaangaliyey, ama sidoo kale loo aqoonsan yahay cusbitalaal ahaan. Dhismayaal badan oo ay kaga shaqeeyaan Urur Cusbitalaal liisan kaliya gobol waxa loo tixgaliyaa Cusbitalaal kaliya.
- 1.2 Ururka Cusbitalaal. Waa urur la aqoonsan yahay, ama raadinaya aqoonsi, sida ku cad Qaybta 501(c)(3) kaasi oo ka shaqeeya hal ama ka badan oo Cusbitalaal. Tan waxa kamid ah urur kale oo kasta kaasi oo shaqadiisa koowaad ama ujeedadiisa koowaad tahay bixinta daryeelka Cusbitalaal.
- 1.3 Xaddiyada la Oggol yahay. Xaddiga u badan ee lacagta la bixiyo adeegyada daryeelka caafimaad ee la daboolay. Kan waxa loogu yeedhi karaa “kharashka la mutaystay,” “lacagta la oggol yahay” ama “qiimaha lagu heshiiyey.”

- 1.4 Xaddiyada Guud ahaan lagu Dallaco Dadka Leh Caymiska (AGB). Qaabka soo socda waxa isticmaala Cusbitalada si ay u xisaabiyaan Xaddiyada Guud ahaan lagu Dallaco Dadka Leh Caymiska siyaasaddan.
- 1.4.1  $AGB\% = (Wadarta\ Dhammaan\ Xaddiyada\ ay\ Oggolaatay\ Khidmadda\ Adeegga\ Medicare + Wadarta\ dhammaan\ Xaddiyada\ ay\ Oggol\ yihiin\ caymisyada\ caafimaadka\ ee\ gaarka\ loo\ leeyahay\ muddo\ dhan\ 12\ bilood) / (Wadarta\ Guud\ ee\ Khidmadaha\ Isla\ Sheegashooyinkaas)$
- 1.4.2  $AGB = (Khidmadaha\ Guud\ ee\ Daryeelka\ ama\ Gurmada\ Caafimaad\ ahaan\ Daruuriga\ ah) \times (AGB\ \%)$
- 1.4.3 AGB-ga wakhtigan ee Cusbital UPH ah oo kasta waxa lagu lifaaqay Jadwalka B ee siyaasaddan. Xaddiyada AGB waxa la beddeli sannad kasta.
- 1.5 Daryeelka Caafimaad ahaan Daruuriga ah. Adeegyo (1) waafaqsan cudurka iyo daawaynta xaaladda bukaanka; (2) in la raaco istaandarrada dabbaakhadaha fiican ee caafimaad; (3) looga baahan yahay buuxinta baahida caafimaad ee bukaanka iyo inay ahaato sababo aan ahayn habboonaanta bukaanka ama xirfadlaha ama daryeelaha bukaanka; iyo (4) nooca adeegga ugu rakhiisan kaasi oo si fiican u buuxinaya baahida caafimaad ee bukaanka.
- 1.6 Daryeelka Caafimaad ee Gurmada ah. Sida ku qeexan Xeerka Daawaynta Caafimaad ee Gurmada iyo Shaqalaha (EMTALA), xaalad caafimaad oo ku calaamadsan astaamo kulul oo darnaansho ku filan leh kuwaasi oo ka maqnaanta daryeel caafimaad oo degdeg ah macquul ahaan la fili karo inay keenaan badista caafimaadka bukaanka khatar, dhantaalid halis ah ee shaqada jidhka, ama talax-gab qayb kamid ah xubnaha jidhka. Sidoo kale waxa kamid ah haweenay uur leh oo foolanaysa.
- 1.7 Bukaanada. Waxa kamid ah bukaanka iyo/ama cidda ka masuulka ah bukaanka (waalid, wakiil, kafiil).
- 1.8 Bukaanada Mutaystay-FINA. Bukaanada raaca hab-raacyada lagu sheegay siyaasaddan lana go'aamiyey inay mutaysteen kaalmada dhaqaale marka siyaasaddan la eego.
2. Mutaysiga Kaalmada Dhaqaale.
- 2.1 Kaalmada dhaqaale waxa heli kara oo klaiya Daryeelka Caafimaad ahaan Daruuriga ah iyo Daryeelka Caafimaad ee Gurmada ee la siiyo Bukaanada Mutaystay-FINA. Kaalmada dhaqaale waa inay kusalaysnaato tilmaamaha soo socda, ilaa ay ka hor imanayso shuruudaha sharciga gobolka oo isaga la raacayo kolkaas sida ku cad Jadwalka A ee ku lifaaqan siyaasaddan.

- 2.2 Bukaanaada Mutaystay-FINA ee ka hooseeya 600% Tilmaamaha Dakhliga Sabolnimada Fadaraalka ee Wakhtigan (FPIG) waxay noqon karaan Mutaystayaal-FINA. Bukaanaada Mutaystay-FINA lagu dallici maayo in kabadan Xaddiyada Guud ahaan lagu Dallaco Bukaanaada leh caymiska.
- 2.3 Biilashada Cusbitaalka waxa la sii nusqaamin xaddiyada soo socda bukaanaada qayb kasta oo FPIG ah oo hoosta ku qoran:
- |                          |                         |
|--------------------------|-------------------------|
| <u>0-200% ee FPIG:</u>   | 100% qiime-dhimista AGB |
| <u>201-225% ee FPIG:</u> | 65% qiime-dhimista AGB  |
| <u>226-250% ee FPIG:</u> | 45% qiime-dhimista AGB  |
| <u>251-300% ee FPIG:</u> | 25% qiime-dhimista AGB  |
| <u>301-400% ee FPIG:</u> | 5% qiime-dhimista AGB   |
| <u>401-600% ee FPIG:</u> | AGB kaliya              |
- 2.4 Dakhliga qoyska waxa la tixgalin go'aaminta haddii Bukaana mutaystay kaalmada. Dakhliga qoyska waxa kamid ah laakiin aan ku ekayn waxa soo socda: Lammaanaha sida caadiga ah isku guursaday, carruurta (kuwa la dhalay, kuwa lammaanuhu dhalay, ama kuwa la korsaday) iyo lammaanaha wada nool. (Lammaanaha isqaba ama wada nool waxay u baahan yihiin in dhinacyadu joogaan lammaane ahaan oo kharashka wadaagaan, ha isku jinsi noqdaan ama ha kala jinsi noqdaan.)
- 2.5 Marka laga tago dakhliga qoyska, Cusbitaalku wuxuu tixgalin ilaa xadka qoyska Bukaanku uu leeyahay hanti loo isticmaali karo in lagu buuxiyo baahiyihiisa dhaqaale. Hantida waxa kamid noqon kara, laakiin aan ku ekayn, lacagta cad, kaydada iyo xisaabaha jeegga, shahaadooyinka dhigaalka, badeecad iyo curaaraha, xisaabaha hawlgabka ee qof ahaaneed (IRAs), sanduuqyada ammaanada, hantida ma-guurtada ah (oo ay ka baxsa yihiin guriga Bukaanka) iyo baabuurta. Cusbitaalku sidoo kale wuxuu xisaabta ku darsan wixii daymo ah ee lagu leeyahay qoyska bukaanka.
- 2.6 Macluumaad ka yimi dalabyada dhaqaale ee hore ee Bukaanka (ama xubin qoyska Bukaanka) waxa loo isticmaali karaa go'aaminta mutaysiga wakhtiga ee kaalmada. UPH sidoo kale waxay isticmaashaa wakaaladaha dhinac saddexaad si loo caawiyo ururinta. Haddii wakaaladahan siiyaan UPH bayaan sheegaya suurogalnimada Bukaanka ee heerka FPIG, UPH waxay u isticmaali macluumaadkaas go'aaminta xaaladda Mutaysiga-FINA iyo heerka qiime-dhimista ee jira.
- 2.7 Mutaysiga Malaynta ah. Bukaanaada buuxiyaha shuruudaha mutaysiga malaynta ah marka la eego Qaybtan waxa dhici karta in loogu deeqo kaalmo

dhaqaale iyada oon la dhammaystirayn dalabka kaalmada dhaqaale. Dokumentiyada taageeraya u-qalmidda Bukaanka ee ama kaqaybqaadashada barnaamij ku qoran hoos ee 2.7.1 waa in la helo oo fayl lagu rido. Dokumentiyada waxa kamid noqon kara nuqul kaadh dawladdu bixisay ama dokumentiyo kale oo sheegaya mutaysiga ama u-qalmidda, ama ku qoran shaashadda bogga websayt oo sheegaya mutaysiga Bukaanka. Ilaa si kale loo qoro mooyiye, Bukaanku loo malaynayo inuu mutaystay marka la eego shuruudaha malaynta ah waxay sii wadi inay mutaysiga ku sii jiraan lix bilood kadib taariikhda oggolaanshaha hore, ilaa shaqaalaha Cusbitaalku ay hayaan sabab la rumaysto Bukaanku inaanu buuxin hadda kadib shuruudaha malaynta ah.

2.7.1 Bukaanku u-qalma kana helayana dheefo barnaamijyada soo socda waxa loo qaadan karaa inay mutaysteen kaalmada dhaqaale 100%:

2.7.1.1 Adeegga Cuntada Beeraha iyo Nafaqada Waaxda Maraykanka *Barnaamijka Tigidhka Cuntada*.

2.7.1.2 Mutaysiga xaddidan – Dadka sharci darrada ah ee aan la dokumenti garayn/daaqadda gurmada 3-maalmood. Waaxda Iowa ee Adeegyada Dadku waxay oggol yihiin ilaa saddex maalmood dheefaha Medicaid inay ka bixiso kharashka adeegyada gurmada ee dadka aan la dokumenti garayn kuwaasi oon buuxin shuruudaha muwaadinimada, xaaladda laajinimada, ama lambarka sooshiyaal sikiyuuriti. Adeegyada gurmada waa in lagu bixiyo Cusbitaal kaasi oo bixin kara daryeelka loo baahan yahay kadib xaaladda gurmada caafimaad marka ay dhacdo. Mutaysiga malaynta ee qaybtan waxa loo tixgalin mid sax ah 6 bilood laga bilaabo taariikhda dhacdata gurmada.

2.7.1.3 Barnaamijka Medicaid (laga reebo meel gaar ah ku xidhnaanta iyo/ama buuxinta shuruudaha Medicaid)

2.7.1.4 Kaalmada nafaqada Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta(WIC)

### 3. Baahinta Macluumaadka Kaalmada Dhaqaale.

3.1 Cusbitaal kastaa wuxuu gaadhsiiin jiritaanka kaalmo dhaqaale dhammaan bukaanada iyo bulshada dhexdeeda. Nuqullada siyaasadda kaalmada dhaqaale (Siyaasadda 1.BR.34), dalabka kaalmada dhaqaale iyo Guudmar Luuqad Fudud ku qoran ayaa laga heli karaa boosta, websaytka Cusbitaal kasta, iyo Cusbitaal kasta haddii aad tagto.

3.2 Xafiiska Dhexe ee Biilasha UPH waxa lagu heli karaa taleefankan (888) 343-4165 si uu uga jawaabo su'aalaha kusaabsan siyaasadda, ama Bukaanku ayada

waa inay tagaan xafiiska lacag-hayaha oo Cusbitaalka ku yaal si uu u helo macluumaadkan.

- 3.3 Cusbitaalada UPH waxay soosaari Guudmar Luuqad Fudud ku qoran siyaasaddan.
    - 3.3.1 Guudmarka Luuqadda Fudud ku qoran waxa laga heli karaa boosta, websaytka Cusbitaal kasta, iyo Cusbitaal kasta haddii aad tagto.
    - 3.3.2 Guudmarka Luuqadda Fudud ku qoran waxa loo bixin doonaa kaqayb ahaan qaadashada Bukaanka iyo/ama habka saarista.
    - 3.3.3 Guudmarka Luuqadda Fudud ku qoran waa inuu kujiro marka Bukaanku loo diro ogaysiis qoran oo sheegaya in Tallaabooyin Ururin oo Aan-caadi ahayn laga qaadi doono. Siyaasadda UPH 1.BR.40, Biilasha iyo Ururinta, waxa ku qoran tafaasiil dheeraad ah oo kusaabsan dhabaahadaha biilasha & ururinta, waxaana dhici karta in laga helo Cusbitaal kasta iyo websaytka Cusbitaal kasta.
  - 3.4 siyaasadda kaalmada dhaqaale, Guudmarka Luuqadda Fudud ku qoran, dhammaan foomamka kaalmada dhaqaale waa in lagu heli karaa Ingiriisi iyo luuqad kale oo kasta ee dadyawga Ingiriisida aan ku fiicnayn ka noqonayaan wax aan ka yarayn 1,000 qof ama kabadan 5% bulshada Cusbitaalku u adeegayo. Dokumentiyadan tarjuman waxa laga heli karaa boosta, websaytka Cusbitaal kasta, iyo Cusbitaal kasta haddii aad tagto.
  - 3.5 Ogaysiisyadan iyo dokumentiyadan waxa lagu bixin karaa elektarooni ahaan.
4. Habka Dalbashada Kaalmada Dhaqaale.
- 4.1 Bukaanku Wuxuu dalbadaa Caymiska ama Raadiyaa Masuuliyad Cid Saddexaad. Si loo tixgaliyo kaalmada dhaqaale, bukaanku waa sidoo kale bixiyaa macluumaad si loo garto khayraad dhaqaale oo kale kaasi oo ay dhici karto in laga bixiyo lacagta daryeelka caafimaad ee Bukaanka, sida Medicaid, Medicare, daynta cidda saddexaad, iwm. Bukaanku leh caymis daryeel caafimaad oo sax ah iyaga oo u mara bixiyayaal aan ahayn UPH waxa laga rabaa inay helaan shabakaddooda koowaad kahor intaan loo tixgalin kaalmada dhaqaale.
    - 4.1.1 Siyaasaddan ma khusayso qaybta adeegyada Bukaanka kuwaasi oo uu bixiyey ama ay dhici karto inuu bixiyey lacagta bixiye cid saddexaad ah sida shirkad caymiska baabuurta ah ama magdhawga shaqaalaha. Sida uu oggol yahay sharciga Gobollada Iowa, Illinois, iyo Wisconsin, marka Bukaanku soo doonto adeegyada kadib shil ama dhaawac, Cusbitaalku waxa dhici karta inuu soo dhigo dayn cusbitaal oo ka dhan ah dayn bixinta cidda saddexaad.

- 4.2 Bukaanku Waa Inuu Dhammaystiro Dalabka Kaalmada Dhaqaale. Si loogu tixaliyo kaalmo dhaqaale ahaan, Bukaanku waa inuu siiyo Cusbataalka dalab kaalmada dhaqaale oo dhammaystiran iyo dokumentiyada taageeraya ee loo baahan yahay. Dalabkan waxa lagu dhammaystiri karaa macluumaadka lagu ururiyey qoraal, afka, ama labada oo la isku daray.
- 4.3 Ogaysiinta Bukaanka Mutaysiga. Kadib helista maclu dhaqaale ee Bukaanka, Cusbataalku wuxuu ku ogaysiin Bukaanka go'aanka mutaysigiisa wakhti macquul ah gudihii.
- 4.3.1 Haddii Bukaanku markii hore u-qalmin kaalmada dhaqaale, Bukaanku dib ayuu u dalban karaa haddii uu jiro isbeddel dakhli, hanti, ama masuuliyadaha qoyska.
- 4.3.2 Bukaan u-qalma kaalmada dhaqaale waa inuu kala shaqeeyo Cusbataalka aasaasidda qorshe lacag-bixin oo macquul ah kaasi oo xisaabta ku darsanaya dakhliga iyo hantida jirta, xaddiga biilka qiimaha la dhimay, iyo wixii lacag-bixino horreeyey.
- 4.3.2.1 Bukaan u-qalma kaalmada dhaqaale waa inuu dadaal daacad ah sameeyo si uu u fuliyo qorshayaasha lacag-bixinta. Bukaanku wuxuu ka masuul yahay sheegista wixii isbeddel ku yimaadda xaaladdiisa dhaqaale kaasi oo saamayn kara awooddiisa inuu iska bixiyo lacagta daryeelka caafimaad ee qiime-dhimista leh ama inuu fuliyo qodobada wixii qorshayaal lacag-bixineed.

*/s/ William B. Leaver*

---

William B. Leaver  
Guddoomiyaha UPH

### **JADWALKA A - Sharciga Illinois**

Xeerka Qiime-dhimista Bukaanka Aan Caysanayn ee Cusbitaalka\*: Marka Illinois la joogo, Xeerka Qiime-dhimista Bukaanka Aan Caysanayn ee Cusbitaalka wuxuu farayaa dhammaan cusbitaalada Illinois inay siiyaan qiime-dhimis bukaanada Illinois ee aan caysanayn kuwaasi oo buuxiyey shuruudaha mutaysi qaarkood.

Marka la eego sharciga, bukaanada leh dakhli qoys oo gaadhaya 200% FPL meelaha magaaloooyinka iyo 125% meelaha miyiyada (ama jooga cusbitaalada helista muhiimka ah) waxay heli doonaan qiime-dhimis 100%. Bukaanada leh dakhli qoys oo u dhexeeya 201-600% FPL meelaha magaaloooyinka iyo 126-300% FPL meelaha miyiyada (ama jooga cusbitaalada helista muhiimka ah) waxay heli doonaan qiime-dhimis 135% ee kharashka cusbitaalka. Xeerku sidoo kale wuxuu leeyahay xaddiga ugu badan ee la ururin karo ee 25% ee dakhliga sannadkii ee qoyska ee kuwa buuxiyey shuruudaha mutaysiga ee aan lahayna hanti la sheegi karo.

Qiime-dhimisahan waxay kaliya khuseeyaan adeegyada daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah kuwaasi oo lagu daboolay Medicare; ma khuseeyo qalliin qurxinta ee xulasho ama adeegyada aan caafimaadka ahayn sida adeegyada bulsheed iyo xirfadeed. Qiime-dhimistan ma khusayso adeegyada dhakhtarka.

Bukaanada waxa looga baahan karaa inay dalbadaan Medicare, AllKids, SCHIP, ama barnaamijyada kale ee dadwaynaha haddii ay u-qalmi karaan.

*\*Xeerka Dadwaynaha IL 95-965*

Xeerka Biilasha Bukaanka ee Caddaaladda ah\*: Illinois marka la joogo, Xeerka Biilasha Bukaanka ee Caddaaladda ah sidoo kale wuxuu farayaa cusbitaalada Illinois inay siiyaan qiime-dhimis bukaanada aan caysanayn kuwaasi oo buuxiyey shuruudaha mutaysi qaarkood.

Bukaanada aan caysanayn ee leh dakhli qoys oo gaadhaya 200% FPL meelaha magaaloooyinka iyo 125% meelaha miyiyada waxay heli doonaan qiime-dhimis 100% oo khayri ah adeegyada ka badan \$300.

Bukaanada aan caysanayn ee leh dakhli qoys oo u dhexeeya 201-600% FPL meelaha magaaloooyinka iyo ilaa 126-300% meelaha miyiyada waxay heli doonaan qiime-dhimis khidmadaha adeegyada ee lacagtu ka badan tahay \$300.

Xeerku sidoo kale wuxuu leeyahay xaddiga ugu badan ee la ururin karo ee 25% ee dakhliga sannadkii ee qoyska ee kuwa buuxiyey shuruudaha mutaysiga.

Bukaanada waxa looga baahan karaa inay dalbadaan caymis iyo/ama kaalmo si ay ugu qalmaan qiime-dhimisahan.

*\*Xeerka Dadwaynaha IL 94-885*

**JADWALKA B – QIIMAHA GUUD AHAANTA LAGU SOO DALACAY/LAGU XISAABIYEEY**  
*(Waxaa la cusbooneysiyeey 1/1/2018)*

	<b>Qiimaha Guud Ahaata Lagu Soo Dalacay/Lagu Xisaabiyey (Amounts Generally Billed, AGB) sida % ee Dalacaada/Lagu Xisaabiyey</b>	<b>Qiimo-dhimista AGB</b>
UnityPoint Health Cedar Rapids – Continuing Care Hospital at St. Luke's L.C.	32%	68%
UnityPoint Health Cedar Rapids – St. Luke's/Jones Regional Medical Center	54%	46%
UnityPoint Health Cedar Rapids – St. Luke's Methodist Hospital	32%	68%
UnityPoint Health Des Moines – John Stoddard Cancer Center	26%	74%
UnityPoint Health Des Moines – Blank Children's Hospital	26%	74%
UnityPoint Health Des Moines – Iowa Lutheran Hospital	28%	72%
UnityPoint Health Des Moines – Iowa Methodist Medical Center	26%	74%
UnityPoint Health Des Moines – Methodist West Hospital	26%	74%
UnityPoint Health Dubuque – The Finley Hospital	35%	66%
UnityPoint Health Fort Dodge – Trinity Regional Medical Center	34%	66%
UnityPoint Health Grinnell – Grinnell Area Hospital	42%	58%
UnityPoint Health Keokuk – Keokuk Area Hospital	32%	68%
UnityPoint Health Madison – Meriter Hospital, Inc.	40%	60%
UnityPoint Health Peoria – Methodist Medical Center of Illinois	30%	70%
UnityPoint Health Peoria – Pekin Memorial Hospital	22%	78%
UnityPoint Health Peoria – Proctor Hospital	32%	68%
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center – Bettendorf	35%	65%
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center – Moline	33%	67%
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center – Rock Island	33%	67%



UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Muscatine	40%	60%
UnityPoint Health Sioux City – St. Luke's Regional Medical Center	43%	57%
UnityPoint Health Waterloo – Allen Memorial Hospital Corporation	38%	62%
UnityPoint Health Waterloo – UnityPoint Health Marshalltown	35%	65%

**JADWALKA C – Adeegyada la Daboolay iyo Hawlaha Bixiyaha ee Isbitaalka**  
*(Waxaa la cusbooneysiyeey 9/30/2017)*

Isbitaalada UnityPoint Health iyo Ururrada Isbitaalada ee soo socda waxaa lagu daboolaa Siyaasadda 1.BR.34, Kaalmada Dhaqaale – Adeegyada Isbitaalka. Guud ahaan, adeegyada bukaanadu ka helaan Isbitaaladaa/Ururrada Isbitaaladaa waxa lagu daboolaa siyaasadda; hase yeeshee, fadlan fiiri qaybaha gaarka ah ee isbitaalka hoos ku qoran waxii caddeyn ah ee adeegyada Bukaanku ka heli karo isbitaal/Urur isbitaal ee gaar ah ee aan lagu daboolin siyaasaddan. Sidoo kale, ka qayb ahaan himilada UPH, waxaanu rabnaa inaanu ka dhigno Isbitaaladeena/Ururrada Isbitaaladeena wax ay heli karaan dhammaan bixiyayaasha bulshadeena ee laga yaabo inay u shaqeeyaan ama aynan u shaqayn UnityPoint Health. Bixiyayaashu waxay noqon karaan dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, kaaliyayaasha dhakhtar, iwm. Si aynu u caawimo fahamka bixiyayaashee lagu daboolay siyaasaddan ee Liis Garaynta Hawlaha Bixiyaha ee faahfaahsan raacida shaxda hoose ayaa faahfaahinaya haddii:

- (1) Adeegyadooda xirfadeed lagu daboolay Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale 1.BR.34 – Adeegyada Isbitaalka.
- (2) Adeegyadooda xirfadeed lagu daboolay Siyaasad Gaar ah ee 1.BR.34(a), Kaalmada Dhaqaale – Bixiyayaasha Aan Ka Socon Isbitaalka ee UnityPoint Health.
- (3) Adeegyadooda xirfadeed aan lagu daboolin wax ah siyaasadaha kaalmada dhaqaale ee UnityPoint Health maadaama aysan ahayn shaqaalaha UnityPoint Health.

<b>Isbitaalada UnityPoint Health</b>	<b>Adeegyada Aan lagu Daboolin Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale (fiiri Liis Garaynta Bixiyaha gaarka ah ee hoos ku qoran sidoo kale)</b>
UnityPoint Health Cedar Rapids – Continuing Care Hospital at St. Luke’s L.C.	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan daryeelka degdega ah, baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Cedar Rapids – St. Luke’s/Jones Regional Medical Center	

UnityPoint Health Cedar Rapids – St. Luke’s Methodist Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan daryeelka degdega ah, baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Des Moines – John Stoddard Cancer Center	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Des Moines – Blank Children’s Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Des Moines – Iowa Lutheran Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Des Moines – Iowa Methodist Medical Center	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.

UnityPoint Health Des Moines – Methodist West Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Dubuque – The Finley Hospital	United Clinical Laboratories wuxuu ku yaalaa isbitaalkeena oo haddii aad ka hesho ayaga adeegyo laguma daboolo siyaasaddan ilaa haddii aad sidoo kale helayso adeegyada isbitaalke. Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Fort Dodge – Trinity Regional Medical Center	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Keokuk – Keokuk Area Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan daryeelka degdega ah, baaritaanka cudurada, iyo raajada lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.

UnityPoint Health Madison – Meriter Hospital, Inc.	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan daryeelka degdega ah, baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, dhalmada iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah. Turville Bay wuxuu ku yaalaa isbitaalkeena oo haddii aad ka hesho adeegyo iyaga laguma daboolo siyaasaddeyna.
UnityPoint Health Peoria – Greater Peoria Specialty Hospital	Ma jiraan wax adeegyo ah oo la daboolay.
UnityPoint Health Peoria – Methodist Medical Center of Illinois	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Peoria – Pekin Memorial Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Peoria – Proctor Hospital	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah. Adeegyada laga helay The Illinois Institute ee ku saabsan ka soo kabashada qabatinka (ka bogsoonta ubarasha balwada) lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale.

UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center – Bettendorf	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada raajada/sawirka lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center – Moline	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada raajada/sawirka lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Medical Center - Rock Island	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada raajada/sawirka lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Quad Cities – Trinity Muscatine	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada raajada/sawirka lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Sioux City – St. Luke’s Regional Medical Center	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Waterloo – Allen Memorial Hospital Corporation	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, raajada/sawirka, iyo suuxinta lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.
UnityPoint Health Waterloo – UnityPoint Health – Marshalltown	Qaybta dhakhtarka/xirfadeed ee adeegyada ku saabsan baaritaanka cudurada, iyo raajada/sawirka lagu ma dabooli doono siyaasaddan kaalmada dhaqaale waxaana loo soo dallaci/loo xisaabin si gaar ah.

**LIIS GARAYNTA HAWLAHA BIXIYAHA EE SOO SOCODA WAXA LOO CUSBOONAYSIIYAA SI RUBUCLE AH (afartii bilood ba)**